



# SINAANTA & DEGAANKA



## Waa Tilaabo ay Magaaladda Seattle Qaadeyo

Waxaa loogu yeerayaa Dowladda, Ururada aan Faaido Doonka aheyn, Deeq Bixiyaasha, Ganacsata, iyo Bulshada in ay tilaabo qadaan.



Seattle  
Office of Sustainability &  
Environment

EQUITY  
&  
ENVIRONMENT

An Initiative of the City of Seattle

equityenviro@seattle.gov  
[www.seattle.gov/equityenviro](http://www.seattle.gov/equityenviro)  
PO Box 94729 Seattle, WA 98124



# HORDHAC


Magaalada Seattle waxey mudo dheer horyaal u aheyd dhaqdhqaqa arrimaha deegaanka. In kastoo Magaaladu aay qaaday tilaaboojin waawayn si ay u cagaarnaato, haddana waxaa soo wajahay caqabado la mid ah tan heysata magaalooyinka Mareykanka ee dhaqdhqaqa arrimaha deegaanka: sababtoo ah iyadoo ay dadka cadaanka ah iyo, bulshooyinka dakhliga-sare leh ay haga siyaasadaha arrimaha deegaanka si ay uga faaideystaan, habka loo marayo, iyo natii-joojinka ka soo baxaya.

**Guud ahaan Maraykanka, midabku waa waxyabaha sida weyn u saadaaliya qofka ku nool meel u dhow hawada wasakhaysan, biyaha, ama ciidda. Intaa waxaa dheer, in tirakoobka dalka, gobol, iyo magaalada ay si deg deg ah isu beddelayaan. Arrintan ayaa muhiimadeedu aysan jirin wax ka sareeya.**

**Sida laga soo xigtay Isbeddellada Heyada la yiraahdo Social Pew:**


**2005:**

**Mareykanka Sideedi  
(8) qofood hal (1)  
ka mid ah waa soo galooti**




**2050:**

**Shantii (5) qofood hal (1)  
ka mid ah waxuu noqon  
donaan soo galooti**




**2040:**

**Dadka Midabka leh ee ku nool nawaaxiga Seattle-Tacoma-Bellevue waxey noqon donaan 54%**




# HORDHAC

Hal sabab oo ku saabsan walaaca cadaaladda deegaanka ayaa inta badan la wajahin sababta oo ah "saqafka cagaaran darteed": kuwa ay aadka u saamaysay waa dadaka aan wakiilka ku laheyn dowlada iyo hay'adaha deegaanka. Inkastoo ay sii kordhayaan kala duwanaanshaha jinsiyadeed ee dalka Mareykanka, **hadana dadka midabka leh 12% ilaa 16% ka mid ah ayaa ka shaqeeya hay'adaha deegaanka**, Ururada Sama Falada, iyo hay'adaha dawladda, waana arrin soo soctay muddo tobannaan sano. Cunsuriyada nidaamka hay'adeysan ayaa sii wada in dadka oo dhan aaney ka faaideystan arrimaha degaanka.



## saqafka cagaaran darteed

hadana dadka midabka leh 12% ilaa 16% ka mid ah ayaa ka shaqeeya hay'adaha deegaanka.





## AJENDAHA SINAANTA & BEY'ADAH AMA DEGAANKA

Guddiga Isku Dhafka ah ee Bulshada Hogaamiya iyo Dhigoodu, waxey la soo shaqeeyeen magaaladda iyo jaaliyadaha si loo horumariyo Ajendaha ku Saabsan Sinaanta & Deegaanka. Yoolka, Xeeladaha, iyo Fursadaha Hoggaamineed waxey ka yimadeen habkii loo soo hawlgalay. Howlo gaar ah oo badan aaya ka soo baxay kulanada bulshada, mudadii lagu guda jiray gogol xaarista iyo diyaarinta ajendaha, waxaana laga heli karaa khadka online ka, waxaana loo baaahan yahay in la helo ama la ogaado ujedooyin iyo maclumaad dheeraad ah iyo in ay ka qeyb galaan una hawlgalan dadka daneeyayaasha ah (stakholders) si loo ogaado fulinta daraasada.

Ururna kaligiis ma beddeli karo nidaamka cadaalada degaanka, mana xaqijin kara faaidada ku jirta sinaanta deegaanka. Iyadoo la howl galinayo dowlada, deeq bixiyayaasha iyo ururada ay tariikh ahaan hogaamiyaan dadka cadaan ka ah iyo bulshaduba oo keli aha, aya si waxgal leh misaanka wax uga badeli karo. Ajendahu waxuu tilmaamayaa qeybo kala duwan oo u wada shaqeyaan sida loo hormarinayo sinaanta iyo deegaanka magaalada Seattle.

### **Horumarinta Sinaanta iyo Degaanka (HSD) Waxaa Afka Ingriiska Lagu yirahdaa: Equity and Environment Initiative (EEI)**

#### **Ajendahu wuxuu adeegsanayaa ereyadan soo saarista:**

**Waxyabaha HSD ay dirada saareyo:** Waa meelaha ay deganyahiin bulshooyinka midabka leh, kuwa soo haajiray, qaxootiga, dadka dakhligoodu yar yahay iyo dadka aqoontooda Ingriisku kooban tahay ay ku nool yihiin. Meelahas iyo kuwaas ayey aadka u saamaysay caqabadaaha dhaqan-dhaqaale iyo deegaanka.

**Dadka HSD:** Waa bulshooyinka midabka leh, soo galootiga iyo qaxootiga, dadka dakhligoodu yar yahay iyo shakhsiyaadka luuqadooda ingriisku kooban tahay. Dhalinyarada ka soo jeeda bulshooyinkaas ayaa sidoo kale mudnaan leh.

**UTDCH Ururada:** Waa Ururada ay Taariikh ahaan Hogaamiyaan Dadka Cadaanka ah



## CAAFIMAADKA DEGAANKA WAA WAX DADKA OO IDIL LEEYAHIIIN

Hawada, Biyaha, Meelaha cagaaran, Cuntada. Aminiga iyo tayada Nolosha

Magaalada Seattle waxey hubineysaa in degaanku uu noqdo nadiif, caafimaad, adkeysi, ammaan ah meelaha ay bulshooyinka midabka leh, kuwa dalka u soo haajiray, qaxootiga, dadka dakhligoodu hooseeyo, dhalinyarada, iyo dadka ku hadlka luuqada Ingiisku ay xadidan tahay ay ku nool yahiin, wax ku bartaan, ka shaqeyaan ama ku ciyaraan.


Siyaasadaha Degaanka iyo barnaamijiyada kor u qaadaya hantida bulshada wax looga qabanayo, sida saamaynta guud ee khataraha badan ee deegaanka, bulshada, dhaqaalaha, iyo culaysyada ku yimaada dadka midabka leh, u diyaar noqoshada si ay bulshooyinka ula qabsadaan isbeddelka cimilada, kordhinta helitaanka cuno caafimaad leh, taageerista xiriirka u dhexmaray dadka wada degan, shaqaalaha, hay'adaha dawladda, iyo warshadaha.


### STRATEJIYADAHA

1. In la hormaariyo xulista cadaaladda deegaanka / lana qiimeyo sinaanta deegaanka si firfircooni lana fahmo in bilaabo wax ka qabashada arrimo badan waqtii isku mar ah oo ay ka mid tahay ciidda wasakhda ah, tayada hawada ee gudaha iyo dibaddu, qiiqa naaftada iyo maadada loo yaqaan LEAD iyo sidoo kale khataraha kale ee loo aqoonsaday meelaha diiradda ay HSD oo ay ku jiraan goobaha lagu noolyahay oo ku dhow degaanka warshadaha.
2. In la horumariyo deegaanka iyo caafimaadka dadweynaha, lana kordhiyo qaab kale oo dhaqameed oo ay uga kalluumaysan karaan bulshada ku nool Duwamish ka Hoose (Lower Duwamish) iyadoo loo marayo iskaashiga hay'adaha maxalliga ah, kuwa gobolka, iyo federaalka.
3. Waxaa loo baahan yahay mashaariic degaanka wax tar u leh, oo si dhameystiran saamayna ku yeelan karta cadaalada bulshada midbyada kal duwany leh iyo adeegsiga aalada la adeegsanayo iyadoo la kaashanayo bulshada.
4. In la abuuro si firfircooni waafaqsan, iyadoo laga hadlayo tariikhdi soojireen ka aheyd ee aan loo sineyn fursadaha tayada goobaha cagaaran , gaadiidka dadweynaha, hawo nadiif ah, caafimaad , cunto dhaqan ahaan ku haboon iyadoo la yaraynayo barakaca

**“Meelaha cagaaran ee caam ka ah [waa in] uu qof kasta uu heli karaa. Ma aha oo kaliya beeraha lagu nastro, laakiin ay ka mid yahiin xarumaha dhaqanka bulshado oo ay dadku isugu iman karaan.”**

— “Xubin ka mid ah bulshada, Got Green” ayaa lag soo xigtag.






# SHAQOOYINKA, DHAQAALAH MAXALIGA AH IYO WADADA DHALINTU U MAREYSO

Fursadaha shaqooyinka cagaaran ee Maxaliga ah

Bulshada midabka leh, dadka soo haajiray, qaxootiga, dadka dakhligoodu hooseeyo, dhalinyarada iyo shakhsiyadka aqoontooda afka ingriisku xaddidan tahi iyo kuwa ay sabool ka dhigtay madaama ay hanan waayeen shaqooyinka cagaaran, oo ay ka mid yahii shaqooyinka la xiriira siyaasada degaanka iyo barnamijyada horumarineed. Siyaasadaha deegaanka iyo barnamijyada lagu horumarinayo shaqooyinka dadka dada yar, oo wadada u xaareysa dhalinta in mudnaanta shaqo la siiyo kuwa halkan degan iyo gancsatada yaryar, oo abuureysa in lacagta lagu shaqeynayo ay tahay mid lagu nolaan karo mushaar ahaan.


## STRATEEJIYADAHA

1. In la xaqiijiyo siyaasadda deegaanka / barnamijyada-gudaha dowladda degaanka iyada oo lala kaashanayo hay'adaha kale ee sida toos ka ah u maalgalinaya dadka HSD, ganacsigooda iyo shaqaalahoodaba.
2. La abuuro qaab iyo nidaam taageero oo loogu talagalay dadka midabka leh si ay u hoggaamiyaan siyaasada deegaanka / barnamij shaqo ee jagooyinka dowladaada iyadoo iskaashi lala yeelanayo ururada bulshada, ganacsatada iyo hay'adaha kale ee deegaanka.
3. In loo abuuro fursado dadka dhalinyarada ah, kana qaybgalaan barnamijyada deegaanka iyo xirfadaha horumarineed, iyadoo wax laga siiyo fursadaha go'aanka la qaadanayo in ay ka mid noqdaan.



**"[Waxaan u baahanahay] in dhalinyaradeenu helaan tababar shaqo. Waxaa jooga dhallinyaro badan xaafaddeena mana heystaan meelo ay iyagu ku qabsadaan waxey u baahanyahiin."**

**— Waxaa yiri Xubin Buslashada Latiinka ka mid ah, South Park Neighborhood**



## BARNAAMIJYADA SINAANTA DEEGAANKA EE MAGAALADA

Kordhintu bulshadu in ay yeelato go'aan qaadashada

Bulshooyinka midabka leh, kuwa soo galootiga, qaxootiga, dadka dakhligoodu hooseeyo, dhalinyarada iyo shakhsiyad aqoontooda luuqada ingriisku xaddidan tahay, in ay awood u yeshaan la xisaabtanka, iyo awooda go'aan-qaadasho ee siyaasadda deegaanka, barnaamijyada, iyo in ay adeegyada wax ku yeshaan. Siyaasadaha iyo barnaamijyada waaxey keenayaan in deegaanka u kobco si guud, iyadoo la kordinato in ay waxtar u yeelato dadweynahaas, lana dhisayo dhaqaalaha bulshada, si leysugu dheeli tirka xarumaha dhaqanka, ilaalinta guryo la awoodi karo, lana yareeyo barakaca.

### STRATEJIYADA

1. In la dhiso qaab ay bulshadu go'aankeeda ku qaadaneyso, si hufan oo ho-gaamin leh, iyo in ay saameyn ku yeeshan qaabka loo qorayo barnaamijyada siyaasada deegaanka.
2. In la hagaajiyo siyaasadda deegaanka ee Magaaladda/ barnaamijyadana la garsiiyo shakhsiyadka iyo ururrada heer hoose oo ay qoysasku ka qayb qaataan si ay uga faaideystaan barnaamijyadan si siman, iyadoo ay iska dhex arkayaan bulshooyinka midabka leh, dadka soo galootiga ah, qaxootiga, dadka dakhligoodu hooseeyo iyo shakhsiyadka aqoontooda afka Ingriisku kooban tahay.
3. La qoro siyaasadaha magaaladda ee degaanka/ barnaamijyada deegaanka, si isku mar wax looga qabto arrimaha bulshada kala duwan oo ay ka mid tahi faa'iidooyinka dhaqan dhaqaale iyo tilaaboyinka laga qaadayo sinaanta degaanka dadweynaha.



"[Waxaan] fahamsanahay in wax ka qabashada arrimaha go'doonka ah ee deegaanka aaney ku filneyn oo keli ah wax ka qabadkeeda haddii aynaan abuurin tilaaboo dheeri ah ee sinaanta caafimaadka bulshooyinka, waana in aan ka shaqeynaa arrimahaas."

— Waxaa yiri-Xubin ka mid ah bulshadda, Puget Sound Sage



# QASIIDOOYINKA BEY'ADDA IYO HOGAAMINTA BULSHADA

Dabaaldega Sheekooinka iyo Maalgelinta Bulshada

Dhaqdhaqaqa deegaanka waxaa uu hogaamiya oo xuddun u ah sheekooinka iyo waayo-aragnimada bulshooyinka midabka leh, dadka soo galootiga ah, qaxootiga, dadka uu dakhligoodu yar yahay, dhalinyarada iyo shakhsiyad ku hadalka luuqada Ingriisku kooban tahi. Siyaasadaha iyo barnaamijyada deegaanka waxey si toos ah maag-alineysaa bulshada, oo taageereysaa hogamiyayaasha bulshada, korna u qaadeysaa dhaqanka munaasabka ah ee degaanka ku habboon, si dadka deegaanka ay arrimahooda xal ugu helaan.

## STRATEEJIYADA

1. La taageero koritaanka, lana siiyo awooda hogaaminta caddaalada deegaanka oo xoog leh iyo iskaashi dhixmara ururada.
2. Kuwa lamaanah la ah barnaamijka Horumarinta Degaanka (HSD) si ay u ururiyaan sheekoojin iyo waayo-aragnimada dhaqan, una balaariyaan sheekooinka deegaanka si ay u abuuran saamayn siyaasadda.
3. La dhiso iskaashiga, kuwa ka shaqeeya daryeelka caafimaadka, tafaariiqleeda, daryeelka caruurta, kuwa wax dhisa, ilaaliyaasha, shaqaalahalee ee adeega warshadaha, si loo horumariyo horumarka deegaanka Seattle.
4. La Isku xiro barnaamijyada deegaanka si dhidibada loogu aaso dhaqanka, korna loogu qaado awoddha bulshada, lana gudbiyo faa'idada arrimaha degaanka ee dhaqan dhaqaale.

**“Waxaan ognahay in ‘Deegaameyntu ay leedahay taariikh dheer ee ka saaritay dadka midabka leh in aaney ka qeyb galin, waxeyn hadda u waareegeysaa in la habeeyo iyo luuqada ku xeeran arrimaha degaanka, ay tallaabo muhim u tahay in la hawlgaliyo bulshadeena in ay ka qeyb qataan go'aamada laga qaadanyo arrimaha. Waxaa yiri”**

—Xubin ka mid ah bulshada, Puget Sound Sage



## FURSADHA HOGAAMINEED

**TILAABO LA DOONAYO IN AY QAADO DOWLADA, BULSHADA,  
URURADA DEEGAANKA IYO DEEQBIXIYAASHA**

Bulshooyinka soo socda waxey tilmaameen fici lo ay taageraan xubnaha bulshada si ay fure ugu noqoto fursada lagu hormarinayo ujeedooyinka iyo straateegiyadaha Sinaanta iyo Ajendaha Deegaanka.

Tilaabo qaadistaas waxey u baahantahay hogaamin xoog leh oo ka imaaneysa dowlada, ururada deeqaha bixiya, bulshada iyo ururada degaanka in ay bilabaan oo wajahan xaaladaha kala duwan ee soo foodsara cadaalada degaanka ee gobalkeena. Halka fici ladaas qaar ay khuseyaan dowlada magaalada oo keli ah, intooda badan waa fursado ay magaaladu u no-qoneys hogaan lagu deydo si ay u caawinto sida ugu wanaagsan si ay u racaan dhinacyada ay lamaanaha yihiin.

**YOOLALKA**



CAAFIMAADKA DEGAANKA WAA  
WAX DADKA OO IDIL LEEYAHIIIN



SHAQOOYINKA, DHAQAALAH  
MAXALIGA AH IYO WADADA  
DHALINTU U MAREYSO



BARNAAMIJYADA SINAANTA  
DEEGAANKA EE MAGAALADA



QASIIDOORYINKA BEY'ADDAA IYO  
HOGAAMINTA BULSHADA

## FURSADHA HOGAAMINEED

### 1. Qiimeynta Sinaanta Degaanka/ Soocista Horumarinta Cadaalada



In la dhiso, lana qiimeeyo sinaanta bulshada iyo magaalada, si loo aburo qiimeyn wadareed ogolaaneysa in laga hadlo marar badan isdhexgalka khataraha badan ee deegaanka, halka mar kali ah looga hadli lahaa wasakhda degaanka. Qiimeyntan ama kala soocidan waxey siineysa tixgelin, arrimaha ku saleeysan midab kala sooca, dhaqaalah xumada, fursadaha iyo xaalandaha busho ee kale oo ay khataraha degaanku gayeeysiineyso deganayaasha iyo shaqaalah. Tani waxey u bahaahan tahay iskaashi sida heyadaha Puget Sound Clean Air Agency iyo King County Public Health iyo waaxyaha kale ee magaalada. Nidaamkan waa in uu ku yimadaa baaritaan ay ka qeyb ka qateen bulshada oo ay ku jiraan xog iyo shekooyin laga soo uruuriyey bulshada. Waana in la tixgaliyo xaalandaha bulshada sida (gadiidka, guryaha, helitaanka cunada /amni darada, jardi-inooinka, tayada hawada, dhinacyada waddooyinka lagu socdo, u adkeysiga cimilada hawada, horumarinta dhallinyarada, xarumaha dhaqanka, iwm) iyo kuwa kale oo aan la cayimin.

#### SAAMAYN:

In la abuuro hab lagu qiimeeyo qadiyadaha degaanka iyadoo lagu wada eegayo indho wadajira, lagu tilmaamayo arimaha cadaaladda deegaanka, iyo in la xaqijiyo in bulshada ay u howlgahso si firfircoona ugana qayb qaadato abuurista arrimaha lagu cabirayo daba gal ka horumarka sinaata degaanka.

### 2. Uruurinta Maclumaadka Dadka



In la dar dar galiyo, dadaalka lagu ururinayo xogta dadka iyo qiimaynta barnaamijada, in si fiican loo fahmo yaa hadda ka faaideysanaya barnaamijada degaanka. Barnaamijada waa in xogta laga soo ururiyo dadka midab ka leh marka ay suurta gal tahay ama taxili ku salaysan Zip Code ama nooca barnaamijka.

#### SAAMAYN:

La dhiibo maclumaad xog dhamaystiran ee ku saabsan qiimeynta Sinaanta Degaanka iyo in loo fahamo haddii barnaamijada deegaanka ay ka faa'iideysanayaan bulshada oo dhan

### 3. Meelaha Tsd Ay Diirada Saareyso



La isticmaalo talooyinka Agendaha Sinaanta iyo Degaanka si ay isu waafaqaan shaqada guud ee degaanka, gobolka, iyo hay'adaha dawladda dhexe, waaxyaha magaalada, bulshooyinka deeqaha bixiya, ururrada ku salaysan bulshada, iyo ururada deegaanka maxalliga ah, in ay beegsadaan maalgelinta meelaha dadka ku noolyahiin, ka shaqeeyaan, wax ka bartaan, kuna ciyaraan. La kordhiyo lahaanshaha bulshada- in ay iyagu lahahaan xalinta iyo in la abuuro barnaamijyo cusub ee deegaanka oo diiradda saaraya in laga fogaado barakac iyo yareynta saboolnimada.

#### SAAMAYN:

Si lagu hogamiyo horumarinta siyaasadaha/barnaamijada waxna looga qabto culaabta wadareed iyo caqabadaha deegaanka ee dhaqan-dhaqaale.

## FURSADHA HOGAAMINEED

### 4. Guddiga Cadaalada Deegaanka



Guddiga waa in uu ka koobnadaa shaqsiyaad leh khibrada horumarinta barnaamijyada/siyaasadaha arrimaha dadka degaanka khuseeya iyo isku xirka bulshooyinkaas ee arrimaha deegaanka.



Guddiga Cadaalada Degaanka (GCD) waa inuu kordhiyaa lahaanshaha bulshada in ay iyadu yeelato xalka iyagoo ka talo bixinaya barnaamijyo/siyaasadaha deegaanka ee jira ama mid cusub, dhiibananaya talo iyo qaabkii loo hirgalin lahaa Agendaha Sinaanta iyo Deegaanka, iyo horumarinta siyaasadaha cadaaladda degaanka.

#### SAAMAYN:

Si loo hubiyo kuwa ay aadka u-saameeysay sinaan la'aanta deegaanka, in ay yeeshaan lahaanshaha go'aan qaadashada, barnaamijka deegaanka / oo ay iyagu qortaan siyaasada iyo hirgalinta agendaha, halka horumarinta iskaashiga uu kala dhaxeeynayo waaxyaha Magaalada (City Department) in ay si fiican isgu xirnadaan, loona helo in xalku ka yimid bulshada ayna u soo gudbiyaan dowlada.

### 5. Siyaasad Cadaalada Deegaanka Ee Magaaladda Seattle



In la abuuro siyaasada cadaalada degaanka si loogu adeego qorshaha hogaan wanaagsan iyo kormeerka arrimaha deegaanka ee Seattle. Siyaasadda waxey cadeynyesaa sida ay Magaaladu uga faa'iidaysan karto qiimaynta maalgalinta si toos ah, waxna looga qabto xiriirkha khataraha badan deegaanka oo ay ka mid tahay culaabta isirka, bulshada iyo culaabta dhaqaalaha iyo in fursado loo abuuro hoggaanka bulshada.



#### SAAMAYN:

In la abuuro qaabka caddaalad deegaanka, oo saameyn ficol wadata leh, kordhineysana la xisaabtanka ku salaysan baahida bulshada midabka leh iyo himilooyinka agendaha.



### 6. Fursado Shaqo Ee Bulshada Midabka Leh U Horseedeysa In Ay Hogaamiyaan Dhaqdhaqaqyada Arrimaha Degaanka



La abuuro fursado heer-dhexe oo dedejinaya hoggaanka, sida shaqo baris gaar ah kuwa ay-saameeyeen sinaan laanta degaanka iyo isirka. Kuwa xirfadooda waayo aragnimo shaqo hooseyso, waxeyna kor u qaadeysaa fursadaha ay shaqooyinka cagaaran ku galayaan, oo ay ka mid yahiin tabarka leyliga oo lacag la siinayo qofka araajida soo gud-bistay. Saxiibo dheraad ah, ayaa qiimeynaya shaqo siinta si loo xaqiqsado kuwa ku haboon in maxlada ugu horeysa shaqada ay ku bilabaan, loona fidiyo tababar leylin iyo in la bixiyo mushaash lagu nolaan karo.



#### SAAMAYN:

La dardar galiyo hoggaaminta iyo koboca dhaqaale, iyo in wax laga qabto "shaqooyinka cagaaran" ee dhaqdhaqaqa degaanka.

## FURSADAHA HOGAAMINEED

### 7. Iskaashi Ficil Iyo Wadajira



Dowladda, deeq bixiyaasha iyo hay'adaha gaarka ah waa in ay isla wada shaqeeyaan si ay u aqoonsadaan istaraatijiyad ah in la dhiso sanduuq dhaqaalaha cadaaladda deegaanka oo joogta ah. Dhaqaalahaasuu waxuu si toos ah u maalgalinaya shaqo ay hogaaminayaan dadka arraimaha degaanku khuseeyso, awoodna lagu siinaya deganayaasha iyo ururada bulshooyinka si ay u qeexaan una hirgaliyaan xalka deegaanka maxalliga ah sanooyin badan.

#### SAAMAYN:

La abuuro fursado lagu badelayo hoggaanka iyadoo loo marayo mashaariic ay diyaariyeen bulshada oo hagaajinya xaaladaha deegaanka lana horumariyo oo laba jibaaro qiimaha badan ee bulshada ku qeexeen.

### 8. Xarunta Codadka Ee Bulshada Midabka Leh



In la hormariyo iskaashiga bulshada, deeqbixiyaasha, dawladda hoose, ururada ay hogaamiyaan dadka midabkoodu cadaan ka yahay, iyo in la qaato dhaqamo iyo luqado kala duwan si qaab midaysan, taas oo gun dhig u ah khibradaha iyo sheekooyin ay hagayaan bulshooyinka midabka leh ee arrimaha dhaqdhqaqa deegaanka. Qaabka daladani waxey noo horseedeysan in aan adeegsano dhaqamadeenaa, bulsho ku saleysan xal u raadinta caddaalada deegaanka oo tusineysa hal-abuuris dhinaca warbaahinta, farshaxanka iyo muusiga. Qaabkan waxuu hogaaminayaas dowladda iyo he'yadaha ay hogaamiyaan dadka cadaank ah, si kor loo qaado dasadasa bulshadu ay u macneysteen hogaaminta mudnaanta deegaanka.

#### SAAMAYN:

In dib loo bedelo qaabka dhaqdhqaqa deegaanka, oo diirada la saaro waayo- aragnimada dadka midabka leh iyo in la dhiso kalsoonida ka dhaxaysa jaaliyadaha iyo ururada ay hogaaminayaan dadka midabkoodu cadyahay, dowladda, iyadoo la xoojinayo wada hadalka lana taageeryo taloyinka iyo ficilada ay bulshada hogaamineyso.

